

## Tilmaamaha Xayeyinta

Waa sharchi darro in la sameeyo, la daabaco, ama lagu soo saaro weedho kala-takoor leh buugaagta iyo wawa la midka ah. Guriyayn kasta oo ka dhaafid leh ee jabiya tilmaamahan ayaa waayaya ka-dhaafitaanka oo waxaana lagu qaadi karaa sharchiyada guriyeynta cadaaladda ah.

## Waa Maxay Guriyeynta Ka Dhaafitaanka lehi?

In kasta oo sharchiyada guriyeynta caddaaladda ay khuseeyaan hoyada qoysaska badani ku jiraan, oo ay ku jiraan guryaha tawnhowska iyo beela kondhiminiyamka, waxaa jira waxyaabo ka reebban sharciga, haddana waxa jira kuwo ka reebban sharciga. Xaaladaha qaarkood sharchiyada waa laga dhaafaya:

- **Dhismayaasha u mulkiiluhu deggan yahay** oo aan ka badhnayn afar aqal, oo mulkiiluhu ku nool yahay mid ka mid ah aqallada oo uusan isticmaalin adeegyada wakiil hanti ma guurto (real estate).
- **Qaarkood guryaha gaar loo leeyahay ee ah guriyaynta qoyska-kalida ah** (mulkiiluhuna seddex ama in kayar oo guryo oo uusan isticmaalin adeegyada wakiil hanti ma guurto).
- **Guriyaynta aan ganaci ahayn** oo ay ka shaqeeyaan ururro diimeed iyo naadiyo gaar loo leeyahay oo ku xaddida deggennashaha xubnaha oo keliya, haddii uusan ururku ku kal takoorin midabka.
- **Guriyeynta waayeelka ee uqalma**, oo ka reebban mamnuucidda takooridda heer qoyseed haddii la ogaado in si gaar ah loogu talagalay oo ay daggan yihiin dad waayeel ah ama qancinaya shuruudaha qaarkood (10kiiba boqol ay deggan yihiin dad ha 62 ama ka waawayn, ama boqolkiiba 80 qoysasku ay leeyihiin ugu yaraan hal deggane oo ah da'da ah 55 ama ka wayn).



## Fadlan ogsoonow:

- Mamnuuca xayeyinta kala-takoorka ayaa quseysa guriyaynta qoyska-kalida ah iyo guriyaynta ay galaan mulkiilayaasha iska lehi oo haddi kale kadhfid leh.
- Ka-dhaafitaannadu waxay khuseeyaan oo kaliya haddii guriga aan la iibin ama lagu kireysan adeegyada iibka ama kiraysiga ee wakiil hanti ma guurto.
- Guriyeynta looma baahna in la siiyo qof sida tooska ah khatarta ugu ah caafimaadka ama badbaadada dadka kale, ama hadda isticmaala daroogooyinka sharci darrada ah.

## SIDAAN ANNAGU KUUGU ADEEGNO ADIGA

OHREP waa wakaalad maamuleed dhedhexaad ah, oo xaqiiqo-raadin ah, fulisana Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee deegaanka Fairfax County iyo Sharciga Guriyeynta Cadaaladda ah ee deegaanka Fairfax County. Annagu ma bixino wakiilnimo sharchiyeed.

Xafiiskayagu ayaa wax kaga qabta kala-takoorka iyada oo:

- Xallisa kiisaska iyada oo loo maro qaadasho, u fiirsi, dhedhexaadin, baaritaan, heshiisiin, iyo dhageysi dadwayne.
- Tijaabisa si ay u ogaato xaddiga kala-takoorka ka jira deegaanka Fairfax County.
- U diyaarisa khudbo-jeediyeaal iyo barnaamijyo ku saabsan mowduucyada xuquuqda madaniga ah, oo ay ka mid yihiin ku kala-takoorla guriyaynta iyo shaqada.

Waxa kale oo aad ka heli kartaa daabacaadyo lacag la'aanah oo ku saabsan kala-takoorka boggayaga internetka iyo marka aad weyddiisato.

## Xafiiska Xuquuqha Aadanaha iyo Sinnaanta Deegaanka Fairfax County

12000 Government Center Parkway, Suite 318  
Fairfax, VA 22035-0093  
Tel: 703-324-2953, TTY 711  
[fairfaxcounty.gov/humanrights](http://fairfaxcounty.gov/humanrights)



Daabacaaddii Deegaanka Fairfax County, Va.

Deegaanka Fairfax County, Va. ayaa u heellan inayna ka jirin kala-takoorka ku saleysan naafonimada dhammaan barnaamijyada, adeegyada iyo waxqabadyada deegaanka. U waafajinta macquulka xeerka naafada ADA iyo qaabab ka duwan oo macluumaaad ayaa la bixin doonaa marka la codsado.



Sebtember 2020 (Somali)

# GURIYEYN CADAALAD LEH

## Helitaanka Guriyayn Marin Loo Siman Yahay Leh: Waa Xaqa U Leeyahay Qof Walbaa



Xafiiska Xuquuqha Aadanaha iyo  
Sinnaanta Deegaanka Fairfax County

## SHURUUCDA GURIYAYNTA CADAALADDA LEH

Qof kastaa ayaa xaq u leh inuu helo guriyayn caddaalad ah. Awoodda uu ugu noolaan karoo halkuu doorato si sharaf leh oo uusan ka baqin takoorid waa xuquuq aasaasi ah oo loo dammaanad qaaday dadka oo dhan.

Xafiiska Deegaanka Fairfax County ee Barnaamijyada Xuquuqda Aadanaha iyo Sennaanta (OHREP) ayaa fulisa Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee degaanka Fairfax County iyo Sharciga Guriyeynta Cadaaladda ah ee degaanka Fairfax County, oo mammuuucday kal-takooridda shaqaalaynta, guriyeynta, u waafajinta dadweyne, waxbarashada gaarka ah, iyo deynya.

Sharciga Guriyeynta Caddaaladda Ah ee Deegaanka Fairfax County ayaa mammuuucaya kala takoorista guriyaynta ee qabanaya cid kasta iyada oo ku saleysan xubinnimada mid ka mid ah kuwan soo socda **kooxaha la difaaco:**

- Isir
  - Midab
  - Ka soo jeed qarameed
  - Diin
  - Lab ama dheddig
  - Waayeelnimada (55 sano ama ka wayn)
  - Heerka qoyseed \* (joogidda reerka ee carruurta ka yar da'da 18 sano)
  - Xaaladda guurka
  - Doorbid lab ama dheddig
  - Isku Aqoonsi lab ama dheddig
  - Xaaladda cidamo ka tirsan hore
  - Isha laga helay fuundaynta
  - Naafonimada
- \* Waxa ka mid ah haweenka uurka leh ama qof kasta oo ku dhex jira habraaca korsashada ama sugidda haynta sharciga ah ee ilmaha.

**Sharciyada caddaaladda ah ayaa qabanaya dhammaan macaamilka la xiriira-guriyaynta oo ay ka mid yihiin kirada, libka, moorgeejka, caymiska mulkiiliyaasha guryaha, iyo qiimeyntaba. Guriyaybta u sharcigu qabanayo waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, hoyada qoysaska badani ku jiraan, oo ay ku jiraan guryaha tawnhowska iyo beela kondhiminiyamka; labadaba guryaha gaara loo leeyahay iyo guryaha dadweynaha; gabaadyada hoyaawayaasha; goobaha guryaha guurguura; guryaha daryeelka caafimaadka; iyo barnaamijyada guriyaynta aan macaash doonka ahayn.**



## MAXAA LA MAMNUUCAY?

Cidina kuma qaadi karto ficilladan soo socda iyada oo lagu saleeyo xubinnimada qofka ee kooxaha la difaaco.

### Libinta iyo kireynta guriyeynta:

- Loo diido in lag kireeyo ama laga iibyo guri.
- Loo diido hoy.
- Loo diido in lagala xaajoodo guriyeynta.
- Loo dejyo shuruudo, xaalado, ama u mudnaan iibsi ah ama kireysi hoy.
- Ay bixiyaan adeegyo guriyayn ama tahsiilaad kala duwan.
- Si been ah loogu diido guriyaynta loo heli karo fiirinta, iibinta, ama kireysiga.
- Si loo macaasho, in lagu kallifo mulkiiliyaasha inay iibyaan ama kireeyaan iyada oo la sameeyo matalaad ku saabsan ka koobnaan jinsi ama qowmiyadeed ee xaafad.
- U jaheeyaan mulkiiliyaasha ama kireystayaasha inay tagaan xaafado gaar ah ama guriyayn ku dhexyaal xaafado.
- Kala sooca kireystayaasha.
- Loo diido qofna inuu marin u helo ama xubin ka noqdo xarun ama adeeg la xiriira iibinta ama kireynta guriyaynta.
- Loo diido in loo oggolaado deggane inuu wax ka beddel macquul ah ku sameeyo hoyga oo lagama maarmaanka u ah degganaha naafada ah si uu isticmaalo oo ku raaxeysto hoyga.
- In Loo diido in la sameeyo u waafajin macquul ah oo ku sharciyada, ujeeddooyinka, habdhaqannada, ama adeegyada, haddii ay u waafajintani lagama maarmaan u tahay degganaha naafada ah si uu isticmaalo oo ku raaxeysto hoyga.
- In laga gaabiyo in laga dhigo dhismayaasha kuwo marin loo heli karo iyadoo la raacayo sharciyada federaalka, gobolka, iyo degaankaba.
- In loogu cagajugleeyo, la qasabo, cabsi la geliyo, ama faragelin klagu sameeyo cid kasta oo ku dhaqamaya xaquuqda guriyeynta ama caawinta kuwa kale ee ku dhaqmaya xuquuqdaas.
- In la adeegsado xayeesiin kala-takoor leh ama la la dhaho ama la qoro kalmado kal-takoor leh oo la xiriira macaamil kasta oo hanti ma guurto ah ama la xiriirta arrin hanti ma guurto.
- La qaado tallaabo kasta oo kale oo hase yeesh ka dhigaysa guriyeynta inaan la heli karin.

### Amaahinta moorgeejka:

- Loo diido amaahinta moorgeejka.
- Loo diido in la siiyo macluumaad la xiriira amaaahda.
- Lagu soo rogo shuruudo ama xaalado aamah.
- La takooro qiimaynta milkiyadda.
- Loo diido iibsasho amaaah.

## SIDA LOO XEREEOY CABASHADA

Haddii aad u malayo in laguu geystey takoorka sharcidarrada ah, waxaad ku xareyn kartaa cabasho OHREP gudaheeda 365 laga soo bilaabo taariikhda takoorka la sheegtay. Si aad u xerayso cabasho ama aad weydiiso su'aalo ku saabsan xeraynta cabashada:

**NA SOO WAC:** 703-324-2953, TTY 711

**BOOQO BARTAYADA INTERNETKA:**  
[fairfaxcounty.gov/humanrights](http://fairfaxcounty.gov/humanrights)

**BOOQO BARTAYADA INTERNETKA:**  
Fairfax County Government Center  
12000 Government Center Parkway, Suite 318  
Fairfax, VA 22035-0093

**Wax lacag ku dallac ah la iskagma qaado** xeraynta cabashada.

**Cabashada waan in lagu xereeyaa gudahooda 365 maalmood** laga soo bilaabo taariikhda kala-takoorka la sheegtay.

## 6DA TALAABO OO LAGU XEREEOYO CABASHO

Billow illaa dhammaad, waa inaad ka filataa tallaabooyinka soo socda inta lagu guda jiro habsocodka baaritaanka.

1. Waxaad buuxin su'aalo weyddiinno qaadasho.
2. Arrimo baare ayaa socodsii doona ka qaadidi waraysi telefoon ama qof ahaanba ah si aad u diyaarisaaan cabashada.
3. Waxaad diyaarin oo aad saxeexi foomka cabashada.\*\*
4. Baaruhu wuxuu ogeysiinayaa ka jawaabha eedaynta.
5. Baaritaan dhammeystiran ayaa dhacaya si loo ogado xaqiyooyinka.
6. OHREP ayaa go'aaminaysa inay caddaymuu ay taageerayaan ama aysan taageerayn sheegashadaada.

\*\* Cabashadaada looma qaddaraniyo in "la xereeyay" illaa aad saxeexo, oo OHREP ay aqbasho oo ay ku shaabbadeyso cabashada oo leh taariikh fayl.

